**Hallo**
**Basel-Stadt**

Kanton Basel-Stadt

# Tacliinta iyo Dugsiga

Nidaamka Waxbarashada
Dugsiga Qasabka ah
Tacliinta / Dugsiyada Sare
Jaamacadaha / Tacliinta Dugsiyada Sare
Aqoonsiga Shahaadada

# Nidaamka Waxbarashada

Wadanka Swiiserlaan marwalba wax la baran karaa, noloshana waala horumarsiin karaa. Waxaa muhiimad gaar ah leh in la barto Xirfad. Qofkii Xirfad barto waxuu sii kordhisan karaa tacliintiisa ama waxuu sii baran karaa Tacliinta sare.

## Qaabdhismeedka / Cidda ku shaqada leh

Swiiserlaan waxaa ka jiro 3 heer oo waxbarasho oo is dulsaaran.
Wadanka Swiiserlaan darajooyinka waxbarashada waxaa loo qeybiyaa 3:

- Iskuullada Qasabka ah (Volksschule: Kindergarten, Primarschule und Sekundarstufe I)
- Barashada xirfadaha ama Dugsiga sare (Sekundarstufe II)
- Jaamacadaha iyo Tacliinta sare (Tertiärstufe)

Hay'adaha Dowlada ayaa isku hoowla tacliinta: Dowlada federaalka, Dowlada hoose iyo Degmooyinka waxay qeybsadaan howlaha iyo waajibaadka. Sidaas darteed ayay Gobolada ugu kala duwan yihiin Dugsiyada iyo nidaamka Dugsiyada.

## Waajibaadka Dugsiga

Gobolka Basel-Stadt waxaa qasab ah Dugsiga hoose in la dhigto 11 sanadood. Taas waxay la micno tahay: Caruurta waa in ay 11 sanadood iskuullada aadaan. Waqtiga Ubadku bilaabayo Iskuulka waa marka uu gaaro 4 sano jir. Hadii ilmahu aadi karin iskuulka waa in cudur daar laga bixiyaa. Hadii ilmaha cudur daar la'aan iskuulka aadin waxaa la ganaaxi karaa waalidkooda.
Caruurta ka yar 16 ka sano ee ku cusub Basel, waaloo ogolyahay inay booqdaan Dugsiga hoose. Dhalinyarada ka weyn da'da 16 jirka ee ku cusub Basel, waxay aadi karaan xarunta macluumaadka xirfadaha ee loosoo gaabiyo BIZ (Berufsinformationszentrum). Warbixin buuxdo oo ku saabsan waxbarashada iyo xirfadaha ay samayn karaan ayay BIZ siin doontaa dhalinyarada.

## Xirfad barashada dugsiyada Qasabka ah kadib

Dugsiyada Qasabka ah kadib dhallinyarada waxay sameyn karaan Xirfad barasho. Dhalinyaro aad u badan ayaa go'aansado Xirfadaha Aasaasiga ah (Berufslehre) inay sameyaan si ay ugu sii gudbaan heerka Tacliinta sare (höhere Berufsbildung). Dhalintu waxay sameyn karaan inta ay kuguda jiraan Xirfad barashada amaba kadib, Shahaadada Qubuulka Tacliinta sare (Berusmaturität) si ay ugu sii gudbi karaan Tacliinta Sare kadibna jaamacadaha iyo Tacliinta sare. 20% waxay booqdaan Dugsigayada Gymnasiumka ee Matuurada (gymnasiale Maturität). Dhalinyarada waxay u ogolaanaysaa inay wax kabartaan Jaamacadaha.

## Deeqaha Waxbarasho

Waxaa jiro Deeqo Waxbarasho (Stipendien) kuwaasoo loogu talo galay dadka aan lacag kufilan haysan, si ay u booqan karaan dugsiyada waxbarashada ama kuwa xirfadda. Waxbarashada Dugsiyada Qasabka ah kadib ayaa lasiiyaa dadka dhaqaale ay isaga bixin karaan Barashada Xirfadaha. Waa macquulgal hadii ay kayimaadeen wadan kale oo ay ku noolyihiin Basel-Stadt inay helaan kaalmadaan waxbarasho. Laakin waxay ku xirantahay hadba wadanka aad katimid iyo inta sano ee aad ku nooshahay Swiiserlaan. Hay'adaha bixiyo deeqahaa waxbarasho ee Gobolka (Amt für Ausbildungsbeiträge) ayaa kusiinayo macluumaad dheeri ah.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/schule-und-bildung/bildungssystem

# Dugsiga Qasabka ah

Dugsiyada Qasabka ah, Carruurta waxay ku baranayaan aqoonta aasaasiga ah. Kadib waxey sii wadan karaan waxbarashadooda. Dugsiyada Dowlada waa bilaash.

## Diiwaangelinta ilmaha

Gobolka ama degmooyinka ayaa ku shaqo leh Dugsiyada dowlada.
Halkan ayaad ka diiwaan gelinaysaa Ubadkaada:
Diiwaangelinta Xanaanada ama Dugsiyada hoose

- Caruurta ku nool Basel-Stadt: Dugsiyada Dowlada Hoose ee Basel-Stadt (Volksschulen Basel-Stadt)
- Caruurta ku nool Riehen: Dugsiyada Degmada Riehen (Gemeindeschule Riehen)
- Caruurta ku nool Bettingen: Dugsiga Degmada Bettingen (Gemeindeschule Bettingen)

Diiwaangelinta Dugsiga Dhexe:

- Volksschulen Basel-Stadt

## Heerarka Dugsiga

Dugsiyada Qasabka ah waxay leeyihiin saddex-Heer. Heerarkan waa kuwo is dul saaran.

- Xanaanada Caruurta (Kindergarten) waxaa la dhigtaa 2 sano.
- Dugsiga Hoose (Primarschule) waxaa la dhigtaa 6 sano. Caawinaad gaar ah hadii ay u baahanyihiin ilmahaada ama ay awood gaar ah leeyihiin, waxay halkaan ka heli karaan caawinaad ku habboon.
- Dugsiga Dhexe (Sekundarstufe I) waxaa la dhigtaa 3 sano. Dugsiga dhexe waxuu leeyahay 3 nooc oo kala duwan (A-Zug, E-Zug, P-Zug). Noocyada heerkaan waa kuwo kala adag.
- Luqadda Jarmalka hadii aysan ahayn afkaaga hooyo saddex-heer waxbarasho ee aan soo sheegnayba waxaad ka helaysaa caawimaad gaar ah.

## Casharada afka Hooyo iyo Dhaqanka (HSK)

Dugsiyada Qasabka inta ay baranayaan caruurta waxay sidoo kale heli karaan koorsooyin ay ku baran karaan afkooda hooyo iyo dhaqankooda (heimatliche Sprache und Kultur, HSK). Caruurta waxay ku baranayaan luqadooda si ay sifiican ugu fahmaan, ugu hadli karaan uguna qori karaan. Sidoo kale waxay wax ka ogaan doonaan taariikhda, juquraafiga, ciidaha iyo dhaqamada wadankooda hooyo. Aad ayaan ugu dhiirigelinaynaa booqashada koorsooyinkaan waana kuwo inta badan bilaash ah xorna aad u tahay inaad booqato.

## Dugsiyada Dowlada / Kuwa gaarka loo leeyahay

Dugsiyada dowladda waa bilaash. Wiilasha iyo Gabdhaha waxay wax ku bartaan hal fasal. Casharrada waa kuwo aan diin ku saabsanayn. 95% Caruurta iyo dhalinyarada waxay aadaan dugsiyada dowladda. Waxaa jiro sidoo kale Iskuullo gaar loo leeyahay. Haddii aad u dirto caruurtaada iskuullada gaarka ah, lacagaha iskuulka adiga ayaa iska bixinaayo.

## Waajibaadka iyo Xaquuqda Waalidka

Waxaad xaq u leedahay in Iskuulka kula wadaago waxa ilmaha halkaas ku barto iyo dadaalkiisa siduu yahay. Waxa jiro kulamo aad la yeelanayso Macalimiinta. Sidoo kale waxaa jiro kulamo waalidiinta oo dhan hal fasal macalimiintu warbixinada ku siinayaan. Waxaana jiro munaasabado iskuulka qabto oo aad kaheli karto warbixino kusaabsan iskuulka. Waa inaad ka qayb gashaa kulamada iyo munaasabadaha uu qabto Iskuulka ay dhigtaan caruurtaada. Sidoo kale waxaad mas'uul katahay in caruurtaada si joogta ah u aadaan Iskuulka.
Waa in aad la wadaagtaa iskuulka, Hadii ay dhacdo in Ilmahaada uu iskuulka aadi waayo, tusaale ahaan haduu xanuunsado. Sidoo kale waa inaad xil iska saartaa in ilmaada ka shaqeeyo casharada lasoo siiyo ama aad ka caawiso casharrada. Tusaale ahaan waxaad weydiin kartaa, waxyaabaha uu ka qabto Iskuulka si joogta ahna waad u fiirin kartaa cashirada loo soo diray inuu ka shaqeeyo. Sidaas ayaad ku tusaysaa ilmahaada inaad daneyneso inaad ka warqabto xaaladiisa.
Hadii aadan wali sifiican u fahamsanayn Nidaamka waxbarashada Swiiserlaan, waxaad booqan kartaa munaasabadaha laga helo warbixinada kusaabsan arimahaas. Waxaa jiro munaasabado si gaar ah loogu qabto dadka ku cusub wadanka Swiiserlaan. Munaasabadaan waxaa la helaa inta badan ayagoo ku baxayo luqado kale.

## Su'aalo / Caawimaad

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan Iskuulka, waa inaad ugu horeyn markasto weydiisaa macalinka fasalka. Macalinka waxuu kuu yahay mar walbo diyaar hadii aad u baahato caawimaad. Hadii macalinka uu dareemo in wax ilmahaaga u baahanyihiin ama uu qabo su'aal ku saabsan ilmahaada, marka ugu horeyso adiga ayuu kula soo xiriiri doonaa. Aad ayay muhiim u tahay in macalimiinta iyo Waalidiinta si wanaagsan u wada shaqeeyaan.
Haddii ilmahaaga ay qabaan dhibaatoyin maskaxeed ama bulsheed. Dhaqaatiirta Cilmi nafsiga ee Iskuulka (Schulpsychologischer Dienst) ayaa adiga iyo Ubadkaadaba idin caawin doono. Caawinta noocaan ah waa mid bilaash ah.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/schule-und-bildung/obligatorische-schule

# Tacliinta / Dugsiyada Sare

Dugsiyada Qasabka ah marka ay soo dhameeyaan, Dhalinyarada inta badan waxay bilaabaan Xirfadbarasho. Haddii aad doonayso inaad wax ka barato Jaamacadaha waxaad u baahantahay Shahaadada diyaarinta Tacliinta Sare. Waxaa loo yaqaan Shahaadadaas "Maturität" waxaadna ku samayn kartaa dugsiyada Sare ama inta aad ku guda jirto barashada Xirfada.

## Muhiimada Xirfad aqooneedka

Inaad Barato Xirfad aqooneed fiican iyo inaad yeelato Xirfad wanaagsan aad ayay muhiim u tahay wadankan Swiiserlaan. Dadaalkaada haduu wanaagsanyahay xiliga Iskuulka xirfado wanaagsan inaad barato ayaad u heli doontaa fursado. Marka aad dhameeyso Dugsiga Qasabka ah waxaad helaysaa fursado kala duwan oo aad isugu diyaarin karto dunida xirfadaha (Sekundarstufe II). Aqoonkasto oo aad kororsato waxay kaaga dhigaysaa fudeyd helitaanka shaqo wanaagsan.
Ma qabtaa Su'aalo ku saabsan Xirfad Aqooneedka iyo Aqoon kororsiga? La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung) ayaa jawaabo waafi ah kusiin doono. Talo bixintan waa mid bilaash ah

## Barashada Xirfadaha Aasaasiga ah

Inta badan Dhalinyarada waxay sameyaan marka ay dhameeyaan Iskuullada waajibka ah kadib, Xirfad barashada aasaasiga ah (Berufslehre). Xirfad barashada noocan ah waxaad ka shaqeynaysaa Shirkad. Halkaas waxaad ku tababaranaysaa Howlihii xirfada looga baahnaa. Dhinaca kale waxaad aadi doontaa Dugsiga farsamada. Waxaa jiro in kabadan 250 Farsamo ama xirfado oo aad shahaado ka qaadan karto. Barashada noocan ah waxay socotaa inta u dhaxeyso 2 ilaa 4 sanadood. Labada sano ee ugu dambeeya Iskuulka waa inaad iskaa u raadsato Shirkad aad ku sameyso tababarka. Iskuulka wuu kugu caawin doonaa raadinta shirkadaha. Sidoo kale waa inay kula raadiyaan waalidka. La taliyaasha dhinaca Xirfadaha, aqoonta iyo nolosha (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung) waxay leeyihiin sido kale adeegyo iyo talobixin ay ugu talogaleen dhalinyarada. Talobixinta noocan ah waa bilaash. Sidoo kale waxaad diyaarin kartaa Shahaadada qubuulka Tacliinta sare ee (Berufsmaturität) inta aad ku jirto Xirfad barashada amaba kadib si aad wax uga baran karto jaamacadaha dalka.

## Dugsiga Sare

Dugsiyada sare (Mittelschulen) waxaa la isugu diyaariyaa Waxbarashada Heerarka Sare ee Dugsiyada Farsamada ama Jaamacadaha (Fachhochschule). Ardayda waxay ku bartaan dugsiyadaan aqoon guud oo ballaaran.
Waxaa jiro dugsiyo sare oo kala duwan:

- Waxaa jiro Dugsiyada sare ee diyaar garowga jaamacadaha (Mittelschulen mit gymnasialer Maturität): Markaad dhameyso dugsigaan waxad geli kartaa Jaamacadaha ama Dugsiyada sare ee Farsamada.
- Dugsiyada sare ee leh shahaadada Fachmaturität oder Berufsmaturität. Marka aad dhameyso dugsigaan waxaad u gudbi kartaa Dugsiyada sare ee farsamada. Sidoo kale waad usii gudbi kartaa Jaamacadaha laakin waa inaad ku baastaa imtaxaanka lagu galo. Marmarna qaarna waxaa jiro shuruudo dheeraad ah oo la isku xiro.

## Barmaajika isudiyaarinta suuqa shaqada

Waxaad tahay 18 ilaa 25 sano jir, waxaadna Gobolka Basel-Stadt soo dagtay kaddib waqtigii iskuullada qasabka ah in la booqdo ahayd. Waxaad hadaba ka qayb qaadan kartaa midka mid ah barnaamijyada ay hayaan xarunta diyaarinta suuqa shaqada (Brückenangebote, ZBA). Waxay kaa caawinaysaa inaad bilow iyo fikir fiican aad kahesho suuqa shaqada. Barnaamijkaan waxuu ka caawinayaa inay kula raadiyaan shirkad aad wax ku barato ama aad tababar ku sameyso. Haddii aad daneyneyso iska diiwaangeli xarunta (Zentrum für Brückenangebote).

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/schule-und-bildung/berufsbildung--mittelschulen

# Jaamacadaha / Tacliinta Dugsiyada Sare

Swiiserlaan waxey u taqaanaa Tacliinta sare labo nooc. Jaamacahada iyo Dugsiyada Sare. Si loo aqoonsado shahaadoyinkaagi heerarka sare waxbarashada ee wadankaaga aad kala timid waa inaad toos ula tagtaa Dugsiyada Sare ee wadanka.

## Nidaamka Waxbarashada Tacliinta Sare

Tacliinta sare ee Swiiserlaan waxaa loo kala saaraa Jaamacadaha iyo Dugsiyada Sare ee Farsamada (Fachhochschulen). Dugsiyada sare ee Farsamada waxaa inta badan lagu bartaa hab farsamo oo la taaban karo halka Jaamacadaha ay yihiin badanaa kuwo u badan duruus qoraal ah iyo aragtiyo guud. Labadan nooc ee waxbarasho waa kuwo siman oo lagu jaangooyay nidaamka reer yurub ee Baloonya (Bologna-System). Dadka ka baxo jaamacadahan waxaa la gudoonsiiyaa shahaadada heerka koowaad ama labaad ee jaamacadaha (Bachelor ama Master) ee laga aqoonsahay yurub.

## Qaabilaadda

Shuruudaha qaabilaada jaamacada way ku kala duwan yihiin jaamacadaha. Shahaadoyinka Dugsiga sare ee Swiiserlaan waa hubaal in laguu qaabilayo barashada Jaamacada. Shahaadoyinka noocan ah ee aad kala timid dibadda la sitoos ah lagaama ogolaanayo inaad jaamacad ku gasho. Si loo aqoonsado shahaadoyinkada oo aad ugasho jaamacadda waa inaad toos ula xiriirtaa jaamacada aad doonaysid inaad wax kabarato. Sida caadiga waxaa la is xiraa luqadda jarmalka ee heerarka sare ah. Jaamacado aan badnayn ah ayaa bixiyo cashiro dhammaantood ku baxayo luqada Ingriiska. La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung) ayaa si bilaash ah kuula socodsiin doono fursadaha kala duwan ee Tacliinta sare.

## Tacliinta Xirfadda Sare

Si lamid ah Dugsiyada sare iyo Jaamacadaha ayaa Wadanka Swiiserlaan Tacliinta Xirfada sare ay tahay wadiiqo aad loo jecelyahay. Waxay u sahleysaa Xirfadleyaasha inay ku takhasusaan oo ka gun gaaraan Farsamooyinkii ay barteen iyo inay qabtaan howlaha maamulka. Tacliinta Xirfadaha sare waxaa lagu dari karaa marka la dhameeyo Dugsiyada Farsamada (Berufslehre). Looma Baahno shahaadada Maturitätka. La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung) ayaa macluumaad bilaash ah kaa siin doono fursadaha kala duwan ee Tacliinta Xirfadaha sare.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/schule-und-bildung/universitaeten--fachhochschulen

# Aqoonsiga Shahaadada

Shahaadooyinka dibadaha kuligood kama shaqeeyaan Swiserlaan. Sababo gaar ah ayaa macquul kadhigi karo in laguu badalo shaqaadada. Shaqooyinka Qaar waa qasab in laguu aqoonsado shahaadoyinka aad ka haysato.

## Aqoonsiga

Dadka wax kuso bartay dibadda ee shahaadoyinkooda doonaya inay ku shaqeystaan ama wax kaga bartaan Swiiserlaan shuruudo ayaa jiro hadii ay soo buuxiyaan u saamaxayo in loo tixgaliyo shahaadoyinkaas. Ansixinta waxaa lagu cadeynayaa in ay isku mid yihiin shahaadoyinkii dibadda aad kala timid iyo kuwa Wadankaan laga bixiyo inay isku qalmaan. Xirfadaha qaar sida dadka ka howlgala goobaha Caafimaadka ama Macalimiinta iyo wixii lamid ah (Pflegefachleute, Lehrpersonen usw.) waa qasab in shahadadooda loo ansixiyo si ay halkan shaqooyinkooda ugu shaqaysan karaan. Aqoonsiga shahaadooyinka hadba nooca shaqada ay tahay ayay u kala duwan yihiin xarumaha ku shaqada leh ansixintooda. Aqoonsiga shahaadada ma ahan bilaash. Warbixino dheerad ah waxaad ka heli kartaa Xarumaha qaranka ee qaabilsan aqoonsiga shahaadoyinka ama La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung).

## Caddeeynta Heerka Waxbarashada

Shahaadooyinka aan ahayn shaqooyinka Howlaha guud qasab ma ahan in laguu ogolaado inaad Swiiserlaan kaga shaqeeysato. Shaqooyinka noocan ah waxaad dalban kartaa Cadeeynta Heerka waxbarashada (Niveaubestätigung). Qaabkaan waxaa lagu muujiyaa Heerka waxbarashadii dibadda iyo Nidaamka Waxbarasahda ee Swiiserlaan. Cadeynta noocan ah waxay kaa caawin kartaa shaqo raadinta. Warbixino dheeraad ah waxaad ka heli kartaa Xarumaha qaranka ee ku shaqada leh Aqoonsiga shahaadooyinka (Nationale Kontaktstelle für Diplomanerkennung) ama La taliyaasha dhinaca waxbarashada, xirfadaha iyo wadada loo maro (Berufs-, Studien- und Laufbahnberatung).

## Waxbarashada Kuceliska ah

Dadka waaweyn ee khibrado shaqo leh balse aanan haysan shahaado Swiiserlaan laga aqoonsanyahay waxay dib u baran karo xirfadahooda booqanayana Barashada xirfadaha Aasaasiga ah ama Barashada Xirfadaha Sare. Habraacan waxuu ku xiranyahay aqoontaada, Khibrada xirfadaada aad u leedahay iyo da'daada. Si kastaba ahaatee Heerka luqadda Jarmalka ee B1/B2 ee nidaamka Yurub (Niveau B1/B2 nach GER) aad gaarsiisantahay ayaa ah shuruudaha saldhiga u ah inaad sameyso waxbarashada noocan ah.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/schule-und-bildung/diplomanerkennung